

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 3aad

Muqdisho,

2015

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – RUKUNKA: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2015



Meel marinta Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Carruurta**MADAXWAYNAHA J.F.S**

Markuu Arkay: Qodobka 82aad, Faqradda, 2aad, Dastuurka KMG ee J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfaha 'F' iyo 'Q' ee Dastuurka KMG J.F.S, Qodobkaasi oo sharci ahaan awood u siinaaya Madaxweynaha J.F.S inuu saxiixo Heshiisyada Caalamiga ah ee Dowladda Qeyb ka tahay

Markuu Arkay: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 555/3/1/14 ee soo baxday 13/12/2014 kuna saabsan Qaraarka Golaha Shacabka lagu ansixiyay Heshiiska UN-ka ee Xuquuqda Caruurta ee soo baxay 20/11/1989 kaas oo dhaqangalay 02/09/1990.

Markuu Tixgeliyay: In ay jirto in loo qabo baahi weyn in la badbaadiyo lana daryeelo Caruurta Soomaaliyeed meel kasta oo ay ku sugan yihiin.

Waxa uu soo saaray Sharcigaan:**Qodobka 1aad**

Waxa uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed halkaan ku oggolaaday isla markaasina caddaynayaa in Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Carruurta inuu ka mid noqday Shuruucda Dalka laga bilaabo taariikhda uu Madaxweynaha saxiixo Sharcigaan iyada oo loo gudbinayo xafiiska Xog-hayaha Guud ee Qaramada Midoobay in laga diiwaangeliyo.

Qodobka 2aad

Waxaa halkaan ku lifaaqan labo nuqul oo Heshiiskan ah oo ku qoran Af Soomaali iyo Ingiriis haddii loo baahdo fasiraad waxaa loo noqonayaa nuqulka Afka Ingiriisiga.

Qodobka 3aad

Waxay Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ka gaabsatay isla markaana aysan aqoonsanayn Qodobada 14, 20 iyo 21 ee Heshiiska kor ku xusan iyo qodobo kasta oo ka hor imaanaya Mabaadii'da Guud ee Shareecada Islaamka.

Qodobka 4aad

Waxa uu Sharciigaan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynaha saxiixo waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 31/12/2014

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD WAAALA DIBWAAN GELIYEY
DIBWAAN NO. <u>11001081190</u>
TAARIIXH <u>22/12/2014</u>
SAXIIXA NO. <u>Madax</u>



Madaxweynaha J. F. S.
Mudane Caban Sheekh Maxamuud

HESHIIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

Oo uu Aqbalay Golaha Guud ee Qarammada Midoobay
20kii Nofembar 1989

Qoraal

GOGOLDHIG

Waddammada Xubnaha ka ah heshiiskan, iyagoo

Tixgelinaya in sida waafaqsan Mabaadii'da lagu muujiyay Axdiga Qarammada Midoobay aqoonsiga karaamada iyo xuquuqda aan la weecin karayn ee loo siman yahay ee dhammaan qoyska aadaamiga ah ay tahay aasaaska xorriyadda caddaaladda iyo nabadda adduunka;

Maanka ku haya inay dadyawga Qarammada Midoobay sida ku cad Axdiga ay mar kale qirayaan (adkaynayaan) niyaddooda xuquuqaha aasaasiga ah ee bani'aadamka iyo sumcadda iyo qiimaha qofka bani'aadamka waxayna goosteen tabantaabin horumar bulsho iyo heer nololeed xorriyad ballaaran;

Aqoonsan in Qarammada Midoobey, sida ay qabaan Baaqa Caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo Heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda ay ku dhawaaqeen oggolaadeenna in qof kasta uu leeyahay dhammaan xuquuqaha iyo xorriyadaha kor lagu soo sheegay iyadoon lagu sameyn kala soocid nooc kasta ah sida: sinji, midab, jinsi, luqad, diin, siyaasad ama afkaar kale, u dhalasho waddan ama asal bulsho, lahaansho, dhalasho ama xaaiad kale oo ahaansho;

Xusuusan in, sida ku qoran Bayaanka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, ay Qarammada Midoobey ku dhawaaqday inay carruurta xaq u leeyihiin xannaano iyo kaalmo gaar ah;

Aaminsan in qoyska oo ah kooxda aasaasiga ah ee bulshada iyo degaanka dabiiciga ah ee koritaanka iyo baraaraha dhammaan xubnihiisa gaar ahaan carruurta ayna tahay inuu helo dhawritaanka iyo kaalmada fagarna maarmaanka u ah si uu u guto mas'uuliyadda uu ku leeyahay bulshada;

Sookoobid aan rasmi ahayn oo ku saabsan qodobbada ugu waaweyn.

GOGOLDHIG

Arartu waxay nakhtiimeysaa mabaadi'ida aasaasiga ah ee Qarammada Midoobey iyo qodobbo gaar ah oo la xiriiira heshiisyada xuquuqda bani'aadamka. Waxay mar kale sugaysaa inay caruurta, nugeylkooda awgiis, ay u baahan yihiin daryeel gaar ahaaneed iyo xafidaad, waxayna si gaar ah u adkeyneysaa daryeelka aasaaska ah iyo mas'uuliyadda ilaalinta ee qoyska. Waxay sugaysaa baahida loo qabo inay ilmuhu helaan ilaalin xagga sharciga ah dhalashada ka hor iyo kaddib, ahmiyadda ay leedahay in la xurmeeyo dhaqammada bulshada ilmuhu ay ku dhex nool yihiin, iyo kaalinta weyn ee iskaashiga caalamiga kaga jiro dhowritaanka xuquuqda carruurta.

Aqoonsan in dhallaanka, si uu shaqsiyad buuxda ugu koro, ay lama huraan tahay inay ku barbaaraan deegaan qoys oo leh nolol ku dhisan farxad, jaceyl iyo is faham;

Tixgelinaya habboonaanta in siqiirka loo diyaariyo inuu bulshada dhexdeeda ku yeesho nolol shakhsiyadeed kuna barbaaro dareenka ujeedooyinka lagu jideeyay Axdiga Qaruumaha Midoobay, gaar ahaan dareenka nabadda, sumcadda, dulqaadka, sinnaanta iyo wadajirka;

Maanka ku haya baahida ah in xannaano gaar ah la siiyo siqiirka oo lagu xusay Bayaankii Geneve ee Xuquuqda Siqiirka ee sannadkii 1924kii iyo Bayaanka Xuquuqda Siqiirka ee Golaha Guud ansixiyey 20kii Nofembar 1959 aqoonsanna Bayaanka Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha, Heshiisyada Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda (gaar ahaan qodobbada 23 iyo 24) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaale, Dhaqan iyo Bulsho (gaar ahaan qodobka 10aad) iyo nidaamyada u dagan wakaaladaha gaarka ah ee ururrada caalamiga ah ee ku hawllan horumarinta carruurta;

Maanka ku haya in, sida ku qeexan Bayaanka Xuquuqda Siqiirka, "siqiirka oo aan, maskax iyo muuqaal bisil lahayn darteed, wuxuu u baahan yahay ilaalin iyo xannaano gaar ahaaneed sida dhawritaan sharci oo ku habboon ka hor iyo ka dib dhalashada";

Xasuusan saadaasha Bayaanka ku saabsan Mabaadii'da Bulsho iyo Qaanuun oo la xiriira ilaalinta iyo barwaaqaynta carruurta iyadoo tixraac khaas ah la siinayo nafaqaynta iyo ilmo korsashada Waddan ahaan iyo Caalami ahaan; Heerarka ugu yar ee Xeerarka Maamulka Caddaaladda Da'yarta (xeerarkii Beyjiin) iyo bayaanka ilaalinta Haweenka iyo Carruurta xaaladaha degdegta ah iyo dagaallada hubaysan;

Aqoonsan in, dhammaan dalalka adduunka ay jiraan carruur ku nool xaalado gaar ahaan qallafsan iyo inay caruurtaasi u baahan yihiin tixgalin gaar ah;

Xisaabta ku daraya ahmiyadda caadooyinka iyo qiimaha dhaqammada ee shacab kasta ee ku wajahan ilaalinta iyo horumarinta suuban ee carruurta;

Aqoonsanaya ahmiyadda uu leeyahay iskaashiga caalamiga ah si loo horumariyo xaaladaha nololeed ee carruurta dal kasta gaar ahaan Carruurta waddammada soo koraya,

Waxay ku heshiiyeen sida soo socota:

QAYBTA 1aad

Qodobka 1aad

Heshiiskan waxaa carruur toola jeedaa qof kasta oo bani'aadam ah oo ka yar da'da siddeed iyo toban jir, haddii qaanuunka lagu dhaqo ilmaha aan qaangaar lagu gaarin muddo ka horraysa.

Qodobka 2aad

1. Qaaruumaha Xubnaha ahi waa inay xurmeeyaan una xaqiijiyaan xuquuqaha uu Heshiiskani siinayo Canug kasta oo ku nool xayndaabka xukunkooda iyadoon loo fiirin ilmaha waalidkiis/keed ama wakiilka qaanuun: sinji, midab, jinsi, luqad, diin, siyaasad ama fikrado kale, u dhalasho waddan, qabiil ama askun bulsho, hanti, naafonimo, dhalasho ama ahaansho kaie;

2. Qaaruumaha Xubnuha ahi waa inay qaadaan tallaabooyin lagu xaqiijinayo in ilmaha laga itaalayay dhammaan noocyo takoorid ama ciqaab lid ku ah; sugnaanta hawlaha/waxqabadka fikrad soo jeedin ama caqiidada waalidka, wakiilada qaanuuneed, ama xubnaha qoyska.

Qodobka 3aad

1. Dhammaan hawlaha khuseeya carruurta, haddii ay wadaan ururrada daryeelka bulshada ee dawladaha ama kuwa gaarka ah, maxkamadaha hey'adaha maamulka ama xeer dejinta, tixgelinta koowaad waa in la siiyaa ilmaha;

Qeexid Ilmo

Ilmo waxaa loo aqoonsan yahay shaqsiga ka yar 18 sano, haddii aysan shuruudda qaran aqoonsaneyn da' intan ka horreysa.

Eexasho La'aan

Dhammaan xuquuquhu way khuseeyaan dhammaan carruurta kala reebid la'aan.

Danaha ugu Fiican ee Ilmaha

Dhammaan hawlaha khuseeya ilmaha waa inay ka tarjumaan danhiisa/heeda. Qaranku waa inuu siiyaa ilmaha

2. Qarammada Xubnuhu waa inay ilmaha u xaqiijiyaan ilaalinta iyo xannaanada taasoo muhim u ah jiritaankiisa/keeda suubban iyadoo la tixgalinayo xuquuqaha iyo waajibaadka waalidkiis/keed, wakiillada qaanuuneed ama shakhsiyaadka kale ee sharci ahaan mas'uulka uga ah isaga ama iyada taas darteedna waa inay qaadaan tallaabooyinka qaanuuneed oo ku habboon.

3. Qarammada Xubnuhu waa inay xaqiijiyaan in hay'adaha adeegyada iyo tasiilaadka mas'uulka ka ah xannaanada ama ilaalinta carruurta ay waafaqsanaadaan nidaamka ay jideeyeen madaxda u xilsaaran, gaar ahaan dhinacyada ammaanka, caafimaadka, tirada iyo tayada shaqaalaha iyo waliiba kormeer xiikas ah.

Qodobka 4aad

Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon ee sharci, maamul iyo dadaal kale oo lagu hirgalinayo xuquuqaha lagu aqoonsaday heshiiskan dhanka xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan, Qarammada xubnuhu waa inay tallaabooyinkaas ugu hawlgalaan heerka ugu sarreeya ee khayraadka ay haystaan iyo haddii loo baahdo inay ku timaaddo qaab shaqo ee iskaashi caalami ah.

Qodobka 5aad

Qarammada Xubnuhu waa inay xurmeeyaan mas'uuliyadaha, xuquuqaha iyo waajibaadka waalidiinta ama halkii lagu dhiqi karo, xubnaha qoyska ballaaran ama bulsho sida ay u nidaamiso caadada gudaha (degaan), wakiillada qaanuunka ama dad kale oo sharci ahaan mas'uul ka ah canugga in la siiyo si la socota koritaanka kartida canugga toosin iyo hanuunin si uu ugu dhaqmo xuquuqaha uu u aqoonsanyahay heshiiskan.

xannaano u qalanta marka waalidka iyo dadka kale ee u xilsaaran ay gudan waayaan mas'uuliyaddaas.

Hirgelinta Xuquuqaha

Dawladdu waa inay intii karaankeeda ah hirgelisaa xuquuqaha ku qoran Heshiiskan.

Talo Waalid iyo Taagta Waxqabad ee Ilmaha

Dawladdu waa inay xurmeysaa xuquuqda iyo mas'uuliyadda waalidiinta iyo xigtada inay ilmaha siiyaan wixii talo ah ee la xiriira waxqabadka ilmaha.

Qodobka 6aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin in ilmó kasta uu xaq u leeyahay inuu noolado.
2. Qarammada Xubnuhu waa inay xaqiijiyaan sida ugu suurto galsan sii noolaanshaha iyo horumarka canugga.

Qodobka 7aad

1. Canugga waa in la diiwaan galiyaa isla marka uu dhasho wuxuuna xaq u yeelanayaa magac laga bilaabo dhalashada, xaq qaadasho jinsiyad, iyo haddii ay suurto gasho xaq inuu aqoodo oo ay xannaaneeyaan waalidkiis.
2. Qarammada Xubnuhu waa inay xaqiijiyaan dhaqan galka xuquuqahaas si waafaqsan qaanuunkooda waddan ahaan iyo waajibaadkooda kuwa ugu muhimsan xeerarka caalamiga ee dhinacyadan, gaar ahaan xaaladaha uu la'aantood canuggu noqon lahaa jinsiyad laawe.

Qodobka 8aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay xurmaynayaan, xaq ilmaha si loo xafido ahaanshihiisa sida jinsiyadda, magaca, iyo xiriirka qoyska sida qaanuunku aqoonsaday iyadoo an lagu sameynayn faragalin sharci darro ah;
2. Haddii canug si sharci darro ah looga qaado qaar, ama dhammaan xaaladaha ahaanshihiisa/heeda, Qarammada Xubnuhu waa inay siiyaan kaalmada iyo ilaalinta ku habboon si si dhakso ah loogu soo celiyo ahaanshihiisa/heeda.

Jiritaan iyo Horumar

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu noolaado, Dawladdana waxaa waajib ku ah xaqiijinta noloshu iyo horumarka ilmaha.

Magac iyo Waddan u dhalasho

Ilmuhu wuxu xaq u leeyahay in loo magac bixiyo marka uu dhasho. Ilmuhu waxa kale oo uu xaq u leeyahay inuu helo xuquuqda jinsiyadda, iyo intii suurogal ah, inuu ogaado waalidkiisa/keeda, lana xannaaneyo.

Haysashada Magacyada

Dawladda ayay mas'uuliyad ka saaran tahay inay ilaaliso, haddii ay lagama maarmaan tahayna, sugto kaabayaasha aasaasiga ah ee dhalashada ilmaha, sida magaca, jinsiyadda iyo xiriirka qoyska.

Qodobka 9aad

1. Qarammada xubnuhu waa inay sugaan in aan canug laga kaxayn waalidkiis/keed rabitaan la'aantooda marka laga reebo haddii madax xilka ahi ay hoosgayso go'aan dib u eegid maxkamadeed ayadoo la waafajinayo xeer nidaamin in kala kaxayntaas ay muhiim u tahay xaalad khaas ah sida midda ku saabsan waalidka oo ku xadgudba ama dayaca ilmaha ama mid ku saabsan marka uu waalidku u nool yahay gaar ahaan in go'aan laga gaaro goobta degaan ee canugga.
2. Dood kasta oo ku saabsan xubinta laad ee qodobkan dhammaan dhinacyada danta ka leh waa in la siiyaa fursad ay uga qayb galaan doodaha lana ogaado aragtidooda.
3. Qarammada Xubnuhu waa inay xurmeeyaan xaq ilmaha laga kexeeyey mid ama labada waalid si loo joogteeyo xariirrada shakhsi aragti toos ahna ula yeesho labada waalid si joogto ah.
4. Haddii kala kaxayntaas uu ka dhashay ficil kasta oo ay bilawday dawlad xubin ah sida qabasho, xarig, masaafurin, dib u celinta ama dhimasho ka timaadda sabab kasta inta qofku u xiran yahay dawladda mid ama labada waalid ama canugga, Qarankaas Xubinta ahi waa inuu marka la waydiisto siiyaa waalidka cunuggaas ama hadii ay ku habboon tahay, xubin kale ee qoyska akhbaarta muuhimka ah ee ku saabsan halka uu jiro xubinta/naha maqan ee qoyska haddii bixinta akhbaarta aysan waxyeello u gaysanayn canugga. Qarammada Xubnuhu waa inay waliba xaqiijiyaan in qaddimaadda codsigaas oo kale uusan cawaaqib xumo ku reebin qofka (dadka) uu khuseeyo.

Qodobka 10aad

1. Sida waafaqsan waajibka Qarammada Xubnaha ee qodobka 9aad, xubinta laad, arjiga uu qorto canug ama waalidkiis/keed si uu uga baxo ama u galo dalka Qaran Xubin ah sabab isu keenid qoys darteed, waa inay ugu hawl galaan Dawladaha Xubnaha si oggolaansho bani'aadaminimo iyo dhaqso ah. Qarammada Xubnuhu waa inay haddana xaqiijiyaan in qaddimaadda codsigaasi uusan cirib xumo u yeelan codsabayaasha iyo xubnaha qoyskooda.

Ka Kaxaynta Waalidka

Ilmahu wuxuu xaq u leeyahay inuu la noolaado waalidkiisa ama keeda haddii aysan jirin sababo kale oo ah danta ugu habboon ee ilmaha. Ilmahu waxuu kale oo uu xaq u leeyahay inuu la xiriir labadiisa waalid haddii midkood ama labadaba ay ka maqan yihiin.

Dib Isugu Keenidda Qoyska

Carruurta iyo waalidku waxay xaq u leeyihiin inay ka baxaan waddan kasta ayna galaan kooda sabab dib u kulan darteed ama joogtaynta xiriirka carruur-walid.

HESHIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

2. Canugga waalidkiis kala deggan yihiin Qarammo kala duwan wuxuu si joogto ah xaq ugu leeyahay, marka laga saaro xaalado khaas ah, xiriir shakhsi ah iyo xiriir toos ah oo uu la yeesho labada waalid.

Arrintaas darteed iyo sida waafaqsan waajibaadka Qarammada Xubnaha sida uu qabo qodobka 9aad, xubintiisa 1aad, Qarammada Xubnuhu waa inay xurmeeyaan xaq canugga iyo waalidkiis/keed oo ah inay ka baxaan waddan kasta marka lagu daro kooda iyo inay gafaan waddankooda. Xaq ka baxidda waddan kasta waa inay ku xirnaadaan oo kali ah xayiraadaha sharcigu banneeyey muhimna u ah ilaalinta ammaanka waddanka, nidaamka guud, caafimaadka guud, ama damiirka ama xuquuqda iyo xorriyadaha dadka kale kuwaaso garab socda xuquuqaha kale ee uu aqoonsan yahay Heshiiskan.

Qodobka 11aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay qaadayaan tallaabooyin ay kula dagaallamayaan debed u baddalidda iyo soo celin la'aanta sharci darrada ah ee carruurta.

2. Arrintan darteed Qarammada Xubnuhu waa inay horumariyaan gelitaan heshiisyo laba dhinacle ama dhinacyo badan ama ku biirid heshiisyo hore u jiray.

Qodobka 12aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay u xaqiijiyaan ilmaha awoodda u leh inuu soo jeediyo aaraa'diisa iyo xaq soo bandhigidda aaraa'daas si xor ah arrin kasta oo taabanaysa canugga, maadaama aragtida canugga la siiyo culayskeeda ayadoo la waafajinayo da'da iyo bisaylka ilmaha.

Kaxeyn sharci darro ah iyo soo celin la'aan

Dawladda waxaa waajib ku ah inay baajiso ama xal u raadiso afduubka iyo haysashada carruurta dibadaha la geeyo, ha ahaado waalidka ama qo kale.

Ra'yiga ilmaha

Ilmaha waxay xaq u leeyihiin inay ra'yigooda u cabbiraar si xor ah, toona tixgeliyo aaraa'da khusaysa ilmaha nafsaddooda.

HESHIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

2. Ujeeddadan darteed, waa in gaar ahaan canugga la siiyo fursad ah in la dhagaysto doodo kasta oo garsoor ama maamul oo taabanaya canugga ha ahaato si toos ah ama iyadoo loo sii marayo wakijil ama hay'ad ku habboon, qaab garab socda xeerarka habka madaniga ee qaanuunka waddaniga.

Qodobka 13aad

1. Ilmuhu waa inuu yeeshaa xorriyadda qawlka; xaqan waxaa ka mid ah inuu doono, helo, bixiyana macluumaad iyo afkaar nooc kasta ah meel kasta ha ahaatee, ha ahaadeen tiraab, qoraal ama daabacaad qaab sawir ama warbaahin-kasta oo uu ilmuhu doorto.

2. Isticmaalka xuquuqdiisu way la kulmi kartaa xayiraado qaarkood hase yeeshee kuwaasi waa inay ahaadaan kuwo qaanuunku qabo muhimkana ah:

a) Xurmeynta iyo sharafta dadka kale; ama

b) Ilaalinta ammaanka waddanka ama nidaamka guud ama caafimaadka guud ama damiirka.

Qodobka 14aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay xurmeeyaan xaqa canugga ee xorriyadda, fakerka, damiirka iyo diinta.

2. Qarammada Xubnuhu waa inay xurmeeyaan xuquuqda iyo waajibaadka waalidka iyo markii loo baahdo ilaaliyeyaasha sharciga ah si ilmaha loogu toosiyo dariiqa isticmaalka xuquuqdiisa/keeda qaab la socda koritaanka kartida canugga.

3. Xorriyadda muujinta qof diintiis ama caqiidadiis waxay la kulmi kartaa oo kali ah xayiraado qaanuuni ah oo loo baahan yahay in lagu ilaaliyo ammaanka guud, nidaamka, caafimaadka ama asluubta ama xuquuqaha aasaasiga ah iyo xorriyadaha dadka kale.

Xorriyadda Qowlka

ilmuhu waxuu xaq u leeyahay inuu si cad u dhiibto aragti diisa/deeda, helo macluumaad, uu bixiyo fikradaha macluumaad uu ogyahay iyadoo aan loo eegin xudduud.

Xorriyad Fikir, Damiir iyo Diin

Dawladdu waxay xurmeneysaa xaq u ilmuhu u leeyahay inuu helo xorriyad fikir, damiir iyo mid diineed, oo kuxiran hannuunin waalidka ee ku habboon.

HESHIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

Qodobka 15aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xorriyadaha ilmaha ee sameysi urur iyo xorriyadda kulan nabadgalyo.
2. Isticmaalka xuquuqahan looma gaysan karo dhimis/xayiraad aan ahayn kuwo waafaqsan qaanuun muhimna u ah bulsho dimuqraaddi ah si loo daryeelo nabadgelyada waddanka, ammaanka guud, nidamka guud, ilaalinta caafimaadka guud ama asluubta ama ilaalinta xuquuqaha iyo xorriyadaha dadka kale.

Qodobka 16aad

1. Canugna laguma samayn karo faragalin si maroorsi ama sharci darro ah arrimihiisa gaarka ah, qoyseed, guri, warqado sidoo kale, si sharciga khilaafsan looma weerari karo sharaftiisa iyo karaamadiisa.
2. Ilmuhu wuxuu leeyahay xaq qaanuuni ah in laga ilaaliyo faragelinta ama weerarkaas.

Qodobka 17aad

Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin kaalinta muhimka ah oo ay qaadato warbaahintu waana inay xaqiijiyaan in ilmuhu uu heli karo akhbaaraadka iyo qalabka kala duwan oo ka soo baxa dariiqyo, waddammo ama caalami ah gaar ahaan kuwa ku wajahan hagaajintiisa/teeda dhan bulsho, wanaajin caqiido iyo qalbi iyo caafimaad jir iyo maskaxeed. Ujeeddadan darteed Qarammada xubnuhu waa inay:

- a) dhiirrigeliyaan warbaahinta si ay u fidiso akhbaar iyo qalab canugga u leh faa'iido bulsho iyo dhaqan waafaqsanna xigmadda qodobka 29aad;
- b) dhiirrigeliyaan iskaashi caalami ah ee ku saabsan soo saaridda, is dhaafsiga iyo fidinta akhbaarta iyo qalabkaas ee dhaqammada kala duwan ee kasoo baxa ilo qaran ama caalami.

Xorriyad Urur

Ilmahu waxay xaq u leeyihiin inay la kulmaan kuwa kale, iskuna biiraan ama sameeyaan ururro.

Ilaalinta arrimaha gaarka ah

Ilmuhu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo faragelinta arrimohooda gaarka ah, kuwa qoyska, guriga iyo waraaqaha lagana ilaaliyo affagaado ama gef.

Helitaan Maciiumaad Habboon

Dawladda ayaa xaqiijinaysa inay carruurtu heli karto warar iyo mowduucyo laga soo ururiyo ilo kala duwan, waxayna dhiirrigelinaysaa qalabka warbaahinta inuu faafiyo wararka ilmaha u leh faa'iido dhaqan iyo mid bulsho, iyadoo qaadaysa tallaabooyin ilmaha looga ilaalinayo mowduucyada wax u dhimaya.

HESHIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

- c) dhiirrigeliyaan soo saarid iyo fidin kutub/buugaag carruureed;
- d) dhiirrigeliyaan warbaahintu inay tixgalin gaar ah siiso baahida luqo ee ilmaha ka tirsan kooxda laga badan yahay ama ku siman goobtiisa dhalasho;
- e) dhiirrigeliyaan horumarin dariiq ku habboon ka ilaalinta ilmaha akhbaar ama qalab dhaawici kara jiritaankiisa/keeda fiican iyadoo maskaxda lagu haynayo sida ku qoran qodobbada 13aad iyo 18aad.

Qodobka 18aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay isticmaalaan dadaalkooda ugu habboon inay xaqiijiyaan aqoonsiga mabaadii'da ah in labada waalid ay leeyihiin mas'uuliyad ka dhaxaysa oo ku saabsan kobcinta iyo horumarinta ilmaha. Waalidku ama, haddii xaaladdu noqon karto, wakiillada qaanuuneed, waxay leeyihiin mas'uuliyadda kooxaad ee korriimada iyo horumarinta carruurta. Danaha u habboon ee ilmuhu waxay noqonayaan taxadarkooda aasaasiga ah.
2. Ujeedooyinka dammaana qaadka iyo horumarka xuquuqaha lagu jideeyay Heshiiskan, Qarammada Xubnuhu waa inay siiyaan waalidiinta iyo wakiillada qaanuuneed kaalmada ku habboon si ay u meel mariyaan mas'uuliyadaha ilmahooda waana inay xaqiijiyaan horumarinta hay'adaha tasiilaadka iyo adeegyada xannaanada carruurta.
3. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon si ay u xaqiijiyaan in carruurta waalidka shaqeeya ay helaan xaqa ka faa'idaysiga adeegyada xannaanada carruurta iyo tasiilaadka ay u qalmaan.

Wajibbaadka Waalidka

Waalidku waxay leeyihiin mas'uuliyad midaysan oo aasaasi ah lana xiriirta korinta carruurta, dawladduna waa inay ku caawisaa arrintan. Dawladdu waa inay waalidka siisaa kaalmo ku haboon oo ku saabsan korinta carruurta.

Qodobka 19aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka xeer dajin, maamul, bulsho iyo waxbarasho oo carruurta looga ilaaliyo dhammaan noocyada handadaad ee jir ama maskax, dhaawac ama xadgudub dayicid ama sixun ula dhaqmid galmo ilaa inta ay ku hoos jiraan xannaanada waalidka, ilaaliyeyaasha qaanuuneed, ama qof kasta oo kale oo ku shaqo leh xannaanada ilmaha.

2. Tallaabooyinkaas ilaalineed waa inay, ka sokow ku habboonaansho, ka mid noqdaan nidaamyo wax ku ool ah oo ku saabsan dajin manaahij bulsho si tageerada muhimka u ah loo siiyo ilmaha iyo dadka haya xannaanada ilmaha iyo waliba noocyada kale ee ka hortagga, qeexidda warbixinta, gudbin baaris tabantaabo, dabagal, hagar daamada halka hore loogu tilmaamay iyo maadaama ay ku habboon tahay ku lug lahaansho garsoor.

Qodobka 20aad

1. Canugga si ku meel gaar ah ama si joogto ah looga qaaday xayndaabka qoykiisa/keeda ama danihiisa ugu wanaagsan aan loo oggolaan karin inay ku sugnaadaan dagaankaas waa inuu yeeshaa ilaalin gaar ahaaneed iyo kaalmo uu siiyo qaranku.

2. Qarammada Xubnuhu waa inay si waafaqsan qawaaniintooda waddaniga u xaqiijiyaan xannaano kale canuggaas asaga ah.

3. Xannaanadaas waxaa ka mid noqon kara kafaalaqaadidda ay qabto shareecada Islaamku, korsasho ama haddii ay lagama maarmaan noqoto in la geeyo hay'adaha ku habboon ee xannaanada carruurta. Marka laga fakarayo xalal, tixgalin mudan waa in la siiyaa baahida loo qabo joogtaynta canugga korriimadiisa iyo jinsiyaddiisa, diinta, dhaqankiisa iyo luqada uu selka ku hayo.

Ka Ilaalin Xadgudub iyo Dayac

Qaranku waa inuu carruurta ka ilaaliya dhammaan qaababka silcinta ee ay waalidka iyo dadka kale ee mas'uulka ka ah xannaanadooda ku sameynayaan carruurta waana inay dajisaa barnaamij bulsho oo ku habboon ka hortaga xadgudubkaas iyo daawaynta dulmanayaasha.

Badbaadinta Ilmaha aan Qoyska lahayn

Dawladda waxaa waajib ku ah inay daryeel gaar ahaaneed u fidiso ilmaha aan qoyska lahayn, xaqiijisana inay heli karaan daryeel u beddela midka qoyska ama in la heli karo macaahid xannaano. Dadaalkan marka la sameynayo waxaa tixgelin mudan in la derso dhaqanka ilmaha uu ka soo jeedo.

Qodobka 21aad

Qarammada Xubnaha aqoonsada iyo/ama kuwa oggolaada habka korsashada waa inay xaqiijiyaan in danaha ugu wanaagsan ee canugga ay noqdaan in la siiyo tixgalinta ugu horreysa waana inay:

- a) Xaqiijiyaan in korsashada canugga ay oggolaadaan oo kaliya madax awood u leh kuwaasoo jideeya si waafaqsan qaanuun ku habboon iyo nidaamyo iyadoo aasaas looga dhigayo akhbaarta loo qaadan karo in korsashada la aqbali karo marka loo eego xaaladda ilmaha ee khusaysa waalidka, qaraabada iyo wakiillada qaanuuneed iyo in haddii loo baahdo, shakhsiyaadka ay khusayso ay dhiibaan oggolaanshahooda korsashada ayadoo lagu salaynayo in talabixintaasi ay tahay lagama maarmaan;
- b) Aqoonsan in ilmo korsashada ka dhaxaysa waddammada loo qaato inay tahay dariiq kale ee xannaanada canugga haddii canugga aan la gayn karin xarun nafaqayn ama qoys korsada ama aan si ku habboon loogu xannaanayn karin waddanka uu canuggu u dhashay;
- c) Xaqiijiyaan in canugga ay khusayso korsashada u dhaxaysa waddamo uu ku raaxaysto ilaalinta iyo hab la mid ah kuwa ka jira xaaladda korsashada waddaniga ah;
- d) Qaadaan dhammaan tallaabooyin ku habboon si loo xaqiijiyo in korsashada u dhaxaysa waddammada in meelayntu aysan sababin dhaqaale ku kasbasha aan habboonayn ee dadka ku lug leh;
- e) Horumariyaan halka ku habboon ujeedooyinka qodobkan ayagoo isla galaya abaabul ama heshiisyo laba dhinacle ama dhinacyo badan qaabkan shaqo dhexdiisa si loo xaqiijiyo in gaynta canugga dal kale ay sameeyaan madaxda awoodda u leh.

Korsasho

Waddammada korsashada laga aqoonsan yahay ama laga oggol yahay, waa in arrintaas loo sameeyaa oo kali ah danaha ugu wanaagsan ee ilmaha iyo oggolaanshaha cidda awood u leh oo kaliya iyo ilaalinta canugga.

Qodobka 22aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan tallaabooyinka ku habboon si ay u xaqiijiyaan in canug raadinaya xaalad qaxootinimo ama loo qaatay qaxooti sida waafaqsan qaanuunka caalamiga ah ama waddani iyo hababka waa in, ha la socdaan ama yay la socon waalidkiis/keed ama qof kasta oo kale uu helaa ilaalin ku habboon iyo kaalmo bani'aadaminimo ee ku raaxaysiga xuquuqda ku habboon ee uu jideeyey Heshiiskan iyo farsamooyinka kale ee bani'aadaminimo ee xuquuqul insaanka caalamiga ah kuwaaso Qarammadaas la soo sheegay ay dhinacyada ka yihiin.

2. Ujeeddadan darteed, Qarammada Xubnuhu waa inay siiyaan sida ay u arkaan inay ku habboon tahay, iskaashi dadaal kasta oo ay wadaan Qarammada Midoobay iyo hay'adaha dawladaha ka dhexeeya ama hay'adaha aan dawliga ahayn ee iskaashiga la leh Qarammada Midoobay si ay u ilaaliyaan caawiyaanna cunuggaas isaga ah ayna baafiyaan waalidinta ama xubnaha kale ee qoyska canug kasta oo qaxooti ah si loo helo macluumaadka lagama maarmaanka u ah dib-isugu gaynta qoyska. Haddii ay dhacdo inaan la heli karin waalidkiis/keed ama xubnaha kale ee qoyska cunugga waa in la siiyaa ilaalinta la siiyo canug kasta oo kale oo si joogto ah ama ku meel gaar ah looga qaaday xayndaabka qoyskiisa/keeda sabab kasta ha ku timaaddee sida lagu soo jideeyey Heshiiskan.

Qodobka 23aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin in ilmaha maskax ahaan iyo jir ahaanba naafada ahi ay si waafi ah ugu raaxaystaan nolol buuxda oo wacan ahna xaalado xaqiijinaya karaamo horumarinaya isku fillaan sahlaysana in ilmuhu uga qayb galo si firfircoon.

2. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xaqa uu u ilmaha naafada ahi uu leeyahay xannaano khaas ah waana inay dhiiri galiyaan oo xaqiijiyaan fidinta ku xiran imkaaniyaadka la heli karo ee ilmaha mudan iyo cidda mas'uulka ka ah xannaanadiisa/deeda iyo kalmada la codsaday kuna habboon xaaladda ilmaha iyo xaaladaha waalidka iyo dadka kale ee xannaaneeya.

Ilmaha Qaxootiga ah

Ilaalin gaar ah ayaa la siiyayaa ilmaha qaxootiga ah ama ilmaha raadinaya aqoonsi qaxootinimo. Waa waajibaadka dawladda inay kaashato ururrada awoodda u leh ee bixin kara dammaanad iyo kaalmo.

Ilmaha Naafada ah

Ilmaha naafada ahi wuxuu xaq u leeyahay xannaano gaar ah waxbarasho iyo tababar si isaga/iyada looga caawiyo uguna raaxaysto nolol buuxda oo nadiif ah sharafta leh uuna gaaro heerka ugu sarreeya ee isku kalsoonaan iyo bulsho ku biirid ee suuro galka ah.

HESHIS KU SAABSAN XUQUUQDA CARRUURTA

3. Aqoonsan baahiyaha gaar ahaaneed ee ilmaha naafada ah kaalmada loo fidiyay sida waafaqsan xubinta 2aad ee qodobkan waa in lagu siiyaa kharaj la'aan markasta oo suurto gal ah ayadoo la tixgalinayo awoodda dhaqaale ee waalidka ama dadka kale ee xannaaneeya canugga, waana in lagu toosiyaa in la xaqiijiyo in ilmaha naafada ay si buuxda ugu furan tahay uuna heli karo tacliin, tababar, adeegyada daryeel caafimaad, adeegyada dhaqan celinta, shaqo u diyaarin iyo fursado ciyaaro ee qaab lagu gaari karo in canuggu gaaro sida suurta galka ee sarraysa ee la qabsashada bulshada iyo horumarkiisa qof ahaaneed, marka lagu daro horumarintiisa/teeda dhaqan iyo caqiido;

4. Qarammada Xubnuhu waa inay horumariyaan iyadoo la raacayo iskaashiga caalamiga ah isdhaafsi akhbaar ku habboon ee dhinaca ka hortagga cudurrada iyo daawaynta carruurta naafada ee xag nafsii iyo xagga shaqada xubnaha jirka, taasoo ay ka mid tahay faafin u oggolaansho akhbaaraha ku saabsan hababka dhaqan celinta waxbarasho iyo adeegyada xirfadaha iyadoo ujeeddada ah in loo surto galiyo Qarammada Xubnaha in ay horumariyaan awoodahooda iyo xirfadahooda si loo ballaariyo khibraddooda dhinacyada la soo sheegay, saas darteedna tixgaliin khaas ah waa in la siiyaa baahida waddammada soo koraya.

Qodobka 24aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xaq carruurta ay u leeyihiin ka dheefsiga heerka u sarreeya ee caafimaad ee la heli karo iyo tasiilaadka ka daawaynta cudurrada iyo dhaqancelinta caafimaadka. Qarammada Xubnuhu waa inay raadiyaan xaqiijinta in aan canug laga qaadin xaqiisa/keeda ka qaybgalka adeegyadaas daryeelka caafimaad.

2. Qarammada Xubnuhu waa inay ku dhaqaaqaan fulin buuxda ee xaqas, khaas ahaan waa inay ka qaadaan tallaabooyin ku habboon:

a) yaraynta dhimashada dhallaanka iyo carruurta;

Caafimaadka iyo adeegyadiisa

Ilmuhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan heerka ugu sarreeya ee caafimaad iyo dawo. Dawladaha ayaa xoogga saaraya inay horumariyaan caafimaadka aasaasiga ah iyo barashada caafimaadka guud iyo yaraynta geerida dhallaanka. Waxay dhiirrigelinayaan iskaashi caalami ah oo ku aaddan horumarinta caafimaadka iyo inay ilmo kasta heli karaan adeeg caafimaad.

b) xaqiijinta in la siiyo kaalmo daawayn oo lagama maarmaan ah iyo daryeel caafimaad dhammaan carruurta iyadoo xoogga la saarayo horumarinta daryeelka caafimaadka aasaasiga ah;

c) la dagaallanka cudurrada iyo nafaqa darrada oo marka lagu daro hawlaha caafimaadka aasaasiga ah iyadoo la adeegsanayo, Inter Alia, farsamada diyaar ahaan la heli karo iyo siin cuntootoyin nafaqaysan oo ku habboon iyo biyo cabitaan oo nadiif ah ayadoo la tixgalinayo khataraha wasakhawga deegaanka;

d) xaqiijinta daryeel caafimaad ee hooyooyinka ka hor iyo kadib dhalmada;

e) xaqiijinta in dhammaan qaybaha bulshada gaar ahaan waalidka iyo carruurta la gaarsiiyo inay galaan waxbarasho lagu taageerayo ka faalidaysiga aqoonta aasaasiga ah ee caafimaadka iyo nafaqada carruurta, faa'iidooyinka naas nuujinta, fayadhawrka, nadaafadda deegaanka iyo ka hortagga shilalka;

f) horumarinta daryeelka caafimaad ee ka hortagga ah hanuuninta waalidka iyo qorshaha waxbarasho iyo adeegyo ee qoyska;

3. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan talaabooyinka waxtarka ah kuna habboon oo leh aragti ah in la tirtiro dhaqammada wax u dhimaya caafimaadka carruurta.

4. Qarammada Xubnuhu waxay ku tallaabsanayaan in ay horumariyaan oo dhiirrigaliyaan iskaashi caalami ah oo leh aragti in tartiib-tartiib loo gaaro meel marin buuxda ee xuquuqda lagu aqoonsaday qodobkan. Arrintan darteed, tixgalin gaar ah waa in la siiyaa baahiyaha dalalka soo korayo.

Qodobka 25aad

Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xaqa canug ay madax awood u lihi ay hoos gaysay sabab xannaano, ilaalin ama daawayn jir ama maskax ahaan caafimaad kiisa/keeda fiirin ammin-ammmin ah ee daawaynta la siiyay ilmaha iyo dhammaan xaaladaha waxtarka u leh meelayntiisa;

Dib u Fiirinta aan
Joogtada ahayn ee Dajinta

Ilmaha ay dawladdu meel dajisay sabab xannaano, ilaalin ama daawayn awgood wuxuu feeyahay in dajintaas loo qiimeeyo si xiriir ah.

Qodobka 26aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay u aqoonsan yihiin canug kasta xaqa ah inuu ka faaiidaysto dammaanadaha bulsho oo ay ka mid tahay caymis bulsho, waana inay qaadaan tallabooyinka ku habboon oo lagu gaari karo meel-marin buuxda ee xaqaan si waafaqsan qaanuunkooda waddaniga ah.
2. Faa'iidooyinkaas waa in haikii ku habboon la dammaanad qaadaa ayadoo la tixgalinayo imkaaniyaadka iyo xaaladaha canugga iyo dadka mas'uuliyadda ku leh kafaala-qaadka canugga iyo qaddarin kasta oo kale oo waxtar u leh codsi ka faaidaysi oo uu sameeyey ama loo sameeyay canugga.

Qodobka 27aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmo kasta uu u leeyahay heer nololeed oo u qalma xag jir, maskax, caqiido, damiir iyo horumar bulsho ee ilmaha.
2. Waalidka/waalidiinta ama dadka kale ee ka mas'uulka ah ilmaha waxaa saaran mas'uuliyadda koowaad in ay xaqiijiyaan inta ay le'eg tahay kartidooda iyo awooddooda dhaqaale, xaaladaha lagama maarmaanka u ah horumarka ilmaha.
3. Qarammada Xubnuhu ayagoo ka ambaqaadaya xaaladaha waddanka iyo imkaaniyaadkooda, waa inay qaadaan tallabooyinka ku habboon si loo kaalmeeyo waalidka iyo dadka kale oo mas'uulka ka ah ilmaha, in ay fuliyaan xaqaan waana inay haddii loo baahdo siiyaan qalab kaalmo ah isla markaana taageeraan barnaamijyo, gaar ahaan dhinacyada nafaqada, dharka iyo hoyga.

Nabadgelyada bulshada

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ka faa'iido nabadgelyada bulshada sida caymin bulsho.

Heerka Noloshu

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo nolol tayo leh oo ugu filan horumarinta dhinacyada muuqaalka, garaadka, arwaaxda, damiirka iyo bulshada. Waalidiinta waxay leeyihiin masuuliyadda aasaasiga ah ee xaqiijinta inay ilmahooda nolol heer sare ah ku noolaadaan. Waajibaadka Dawladdana waa xaqiijinta in dhammaan xuquuqahan la fuliyay. Kaalmada Dawladda waxaa ka mid ah inay taageero maaddi ah siiso waalidiinta iyo ilmahooda.

4. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan tallabooyinka ku habboon sugitaanka kafaalaqaadka uu ilmuhu ku leeyahay waalidka ama dadka kale oo ay canugga ka saaran tahay mas'uuliyad dhaqaale, ha ahaato gudaha Qaranka Xubinta ah ama debedda gaar ahaan, haddii qofka leh mas'uuliyadda dhaqaale ee ilmaha uu ku nool yahay dal ka duwan kan canugga, Qarammada Xubnuhu waa inay horumariyaan ku biiritaan Heshiisyo caalami ah, ama ay isla galaan heshiisyadaas ama ay guntaan heshiisyo kale oo ku habboon.

Qodobka 28aad

1. Qarammada Xubnuhu waa inay aqoonsadaan xaq ilmuhu u leeyahay waxbarasho iyo si loo gaaro xaqaan tartiib-tartiib, saldhigna ay u tahay fursado isku mid ah waa inay gaar ahaan:

a) Waxbarashada aasaasiga ah ka dhigaan mid khasab ah cid walibana ay ku heli karto lacag la'aan;

b) Dhiirrigeliyaan noocyada kala duwan ee waxbarashada dugsiyada sare oo ka kooban caadi iyo waxbarasho mihnadeed, la suurto galiyo helitankooda ilmo kastana uu gali karo lana qaado tallaabooyinka ku habboon sida soo rogid waxbarasho lacag la'aan ah iyo bixin kaalmo lacageed haddii loo baahdo;

c) Ka dhigid waxbarashada sare mid ay geli karto cid waliba ayadoo aasaas looga dhigayo awoodda dariiq kasta oo ku habboon;

d) Samayn macluumaad waxbarasho iyo mihnadeed iyo hanuunin ay heli karaan ayna gali karaan dhammaan carruurta;

e) Samayn tallaabooyin dhiirrigalin iyo imaatin joogto ah ee dugsiyada iyo yaraynta tirada ka tagta;

Waxbarasho

Ilmuhu waxay xaq u leeyihiin waxbarasho dawladda ayaana damaanad qaadaysa inay waxbarashada aasaasiga ah ay noqoto mid qasab ah oo lacag la'aan ah inay dhiirrigaliso in noocyada kala duwan ee dugsiyada sare ay noqoto mid u furan canug kasta ayna ka dhigto tacliinta sare mid ay cid walba ku heli karto karaankeeda. Aadaabta iskuulka waa inay la socotaa xaq iyo sumcadda ilmaha Dawladda waa inay gashaa isakaashi caalami ah si ay u fuliso xuquuqdaan.

2. Qarammada Xubnuhu waa inay qaadaan dhammaan tallabooyinka ku habboon si ay u xaqiijiyaan in nidaamka aadaabta dugsiga loo maamulo qaab la socda sunmadda bani'aadamnimo ee canugga waafaqsanna Heshiiskan.

3. Qarammada Xubnuhu waa inay horumariyaan oo dhiirrigaliyaan iskaashi caalami ah oo la xiriira waxbarashada gaar ahaan aragtida ku saabsan in ay ka qayb qaataan baabi'inta aqoon darrida iyo waxqorid la'aanta adduunka oo dhan ayna sahlaan ka faa'iidsiga aqoonta sayniska iyo farsamada iyo hababka wax dhigidda casriga ah. Arrintaan waa in si gaar ah loogu tixgaliyaa waddammada soo korays.

Qodobka 29aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay ku heshiiyeen in waxbarashada ilmaha loo jiheeyo:

a) Horumarinta Shakhsiyadda, caqliga iyo awoodda maskaxeed iyo jir si uu u helo qowaddiisa buuxda;

b) Horumarinta xushmada xuquuqul insaanka iyo xorriyadaha aasaasiga ah iyo mabaadii'da ku iftiisan Axdiga Qarammada Midoobay;

c) Horumarinta xushmaynta carruurta waalidkood, dhaqan kiisa/keeda luqad iyo astaamo, dhaqammada uu waddanka uu ku nool yahay ilmuhu, waddanka laga yaabo inuu/inay asal ahaan ka yimid/timid iyo ilbaxnimooyinka ka duwan kiisa/keeda;

d) U diyaarinta ilmaha inuu nolol mas'uuliyad leh kula dhex noo laado bulsho xor ah oo leh is faham, nabad, dulqaad sinnaanta jinsiga iyo saaxiibtinimo dhammaan shucuubta, qabaa'ilka, kooxaha waddaniga iyo diineed iyo dadka ku nool degaanka ay ku dhasheen;

e) Horumarinta xushmanyta deegaanka dabiiciga ah;

Ujeeddooyinka Waxbarashada

Waxbarashadu waxay ahaaneysaa mid lagu horumarinayo shaqsiyadda, fahamka, muuqaalka iyo garaadka ilmaha. Waxbarashadu waxay ilmaha u diyaarineysaa inay noqdaan kuwa ku noolaada nolol mas'uulnimo oo bulsho xor ah, inuu ilmahu ixtiraamo waalidka, dhaqanka, luuqadda, dhalashada iyo caadooyin dhaqameedka bulshada uu ka soo jeedo.

2. Dhammaan qaybaha qodobkan iyo qodobka 28aad midna looma qaadan karo inay fara galin ku sameynayaan xorriyadda ay u leeyihiin shakhsiyaad iyo kooxo inay sameeyaan isla markaana hagaan hay'ado waxbarasho, oo mar walba ku khasban dhawritaanka mabaadii'da ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan iyo shuruudaha ku saabsan waxbarashada ay dhiibaan hay'adahaas ay waafaqsanaato heerka ugu hooseeya oo ay dawladdu dajin lahayd.

Qodobka 30aad

Dawladda ay dalalkooda ka jiraan qabaa'il, kooxo diin ahaan iyo luqo ahaanba laga badan yahay ama dadka uu muuqdo nagaadigooda asal ahaan, ilmaha ka tirsan dadkaas laga tiro badan yahay ama nagaadi ah in aan loo diidin xaqooda la noolaanshada xubnaha kale ee kooxda/deeda, si uu ugu raaxaysto dhaqankiisa/keeda, u caabudo uguna dhaqmo diintiisa/teeda ama uu adeegsado luqaddiisa/deeda.

Qodobka 31aad

1. Qarammada Xubnuhu waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmaha ee nasashada iyo madadaalada inuu ciyaaro iyo hawlo maskax furid oo ku habboon da'da ilmaha iyo inuu si xornimo ah uga qaybgalo nolosha dhaqan iyo farshaxan.

